# Cuntada gaarka ah ee dugsiga hoose-dhexe, Macluumaad kugu socda adigaaga waalidka ah

## Codso cunto gaar ah

Dhammaan carruurtu waxay xaq u leeyihiin inay iskoolka ku helaan cuntooyin wanaagsan oo nafaqo leh. Waa muhiim in ay ilmaha baareen hey'adaha caafimaadku si aan si aan lagama maarmaan ahayn meesha looga saarin wax raashin ah. Waa inaad codsiga soo raacsiisaa caddayn taqtar ama waraaqo laga soo saaray faylka caafimaadka si aad u xaqiijiso baahida canugga.

### Waxaad codsan kartaa cunto gaar ah haddii uu canuggu qabo

- Xasaasiyad
- Xasaasiyad is dhaaf-dhaafsan
- Nuglaasho xad dhaaf ah
- U dulqaad la'aan (u dulqaad la'aanta laktosku uma baahna wax caddayn taqtar ah ama waraaqo laga soo saaray faylka caafimaadka)

Uma baahnid inaad codsato cunto gaar ah si uu ilmuhu u helo cunto khudradeed ama cunto uusan hilib doofaar ku jirin iskoolka.

### Si dijitaal ah uga codso barta intarnetka ee iskoolka

Waxaad codsiga ka heleysaa barta intarnetka ee iskoolka, cinwaan hoosaadka "cuntada iskoolka iyo waraaqaha cuntada". Haddii aadan fursad u haysan inaad si dijitaal ah u codsato, waxaad foom waraaqo ah u gudbin kartaa macallinka uu ardaygu hoos yimaado ama macallinka.

### Sannad dugsiyeed kasta goonidiisa ugu xaqiiji inuu ilmuhu leeyahay cunto gaar ah

Codsigayaga cusub ee dijitaalka ah waxaad u baahantahay inaad codsiga geliso marka ugu horraysa oo keliya, ka dibna uma baahnid inaad mar kale codsi sameyso ilaa uu ilmahaagu ka beddesho iskoolka ama ay baahidiisa wax iska beddelaan. Mar kasta oo uu billaabanayo xilli dugsiyeedka deyrtu, waxaa e-mail laguugu soo weydiin doonaa inuu codsigu wili sii taagaanyahay iyo in kale. Haddii aad haa ku jawaabto, uma baahnid inaad codsi cusub soo dirto.

### Waxaad u baahantahay inaad codsi cusub soo gudbiso haddii:

- Canugga baahidiisu ay is beddeshay
- Canuggu uu iskoolka beddelanayo

# Hey’adaha caafimaadka ayaa baaraya baahida cuntada gaarka ah

Inta aadan codsan ka hor, waa in hey’adaha caafimaadku ay ilmaha baaritaan ku sameeyeen. Waxaad codsiga ku soo lifaaqaysaa caddayn taqtar ama qoraal laga soo saaray faylka caafimaadka si loo xaqiijiyo baahida ilmaha.

## Caddayn taqtar ama qoraal laga soo saaray faylka caafimaadka

Ilmaha waa in ay baareen hey’adaha caafimaadka ee Iswiidhan. Caddaynta taqtarka ama qoraalka laga soo saaray faylka caafimaadka waa in ay af-Iswiidhish ku qoreen taqtar, cunto yaqaan ama kalkaaliso caafimaad.

## Ku tijaabi inaad cuntooyinka qaar ka joojiso muddo gaaban

Inta ay hey’adaha caafimaadku baaritaanka wadaan, waxaa laga yaabaa inaad u baahato inaad isku daydo inaad muddo gaaban ka joojiso cuntooyinka uu ilmuhu cuno qaar. Si aad iskoolka ugu tijaabiso, waa in aad si dijitaal ah uga codsataa taas. Ku sheeg codsiga ilaa iyo taariikhda ay tijaabadu soconeyso. Marka ay muddada tijaabadu  dhammaato, waa inaad soo gudbisaa codsi cusub oo wata caddayn taqtar ama qoraal laga soobsaaray fayl caafimaadka.

## Jooji cuntada gaarka ah

Haddii ay hey’adaha caafimaadku baareen inaad tijaabisaan inaad siisaan cunto uu ilmuhu markii hore xasaasiyad ku qabay, waxaa badanaa fiican in guriga lagula billaabo. Haddii ay taasi si fiican guriga ugu shaqeyso, wuxuu cunuggu markaa qaadan karaa waqti gaaban oo tijaabo ah iskoolka xitaa. Taas si dijitaal ah ugu soo sheeg goorta la gaaro. Marka uu waqtiga tijaabadu dhamaado, waa in aad ogaysiisaa jikada iskoolka in cuntada gaarka ah la joojinayo ama soo gudbisaa codsi cusub oo ay la socoto baahida cusub ee ilmaha ee cuntada gaarka ah.

## U sheeg jikada iskoolka haddii uu ilmuhu fasax noqonayo

Haddii uu ilmuhu iskoolka ka maqnaanayo, uuna yahay qof loo diyaariyo cunto gaar ah, waa inaad taa ku wargelisaa jikada iskoolka. Waa inaad sidoo kale jikada iskoolka ku wargelisaa marka uu ilmuhu soo laabanayo mar kale.

## Haddii uusan canuggu soo guran cuntada gaarka ah

Haddii uusan ilmuhu muddo 14 maalmood ah soo guran cuntada gaarka ah, jikada iskoolkuna aysan helin wax macluumaad ah oo sheegaya in uu ilmuhu maqanyahay, waa la joojinayaa cuntada gaarka ah. Haddii uu ilmuhu mar kale u baahdo cunto gaar ah, waxaad u baahantahay inaad mar kale codsato.

# Xiriir

Wixii macluumaad ah ee dheeri ah ee ku saabsan cuntada gaarka ah ee dugsiga hoose-dhexe, kala xiriir jikada iskoolka ama maamule ku xigeenka iskoolka.